MN DEPARTMENT OF HEALTH

# Astaamaha COVID-19 ee PSA

Dadka qaba COVID-19 waxay yeelan karaan neef qabatin, qufac, qandho, muruq xanuun, madax-xanuun, cune xanuun, qadhqadhyo, noog ama daal, sanka oo dareera ama cabudhsanIyo dhadhanka iyo urtoo ka tagta.

Mararka qaar, dadku waxay yeelan karaan matag, shuban, ama caloosha ayaa xanuuni karta.

Isbaar haddii aad leedahay astaamaha COVID-19.

La hadal dhakhtarkaaga, xarunta caafimaadka ee xaafadaada, ama isticmaal agabka baaritaanka onlaynka ah ee websaydka Minnesota COVID Response oo ah (https://mn.gov/covid19/for-minnesotans/if-sick/get-tested/index.jsp) si aad u ogaato in ay tahay in aad is baarto iyo in kale. Caawimo waydiiso qoyskaaga, asxaabtaada ama cid kale haddii aanad aqoon sida loo isticmaalo websaydka ama haddii aanay ku qornayn luuqad aad fahmaysid.

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

08/10/20
COVID-19 Symptoms PSA (Somali)

*To obtain this information in a different format, call: 651-201-4989*